Daawaynta kansarka

Hadii baaritaanadu sheegaan in aad qabto kansar, dhaqtarkaaga ayaa kuu sheegaya daawada kuu fiican . warqadan warbixinta waxa ay kuu tilmaami daaweynta guud ee kansarka.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo kansara. Daaweynta ku haboon mid ka mida kansarka ma aha muhiim in ay ku haboon tahay nooca kansar kaloo ka duwan

Weydii dhaqtarkaaga in uu kuu sharxo wax kasta oo aadan fahmin. Waxaad kaxeysan kartaa saaxiib ama qaraabadaada markuu dhaqtarku kaala hadlayo daaweyntaada. Waad qoran kartaa waxa dhaqtarku ku oranayo ama waad weydiin kartaa in aad cajalad ku duuban karto hadalka. Taasi waxay kaa cawimi in aad xasuusato waxa dhaqtarkaagu ku yiri.

Hadii dhaqtarkaagu uusan ku hadlin luuqadaada, ingiriiskaaguna uusan ahayn heer sare, waxaa laguula talinayaa in aad turjubaan isticmaasho kulanada muhiimka ah ee daaweyntaada. Weydiiso dhaqtarkaaga in uu kuu qabto turjubaan yimaada wadahadalkiina.

Waxaad u baahan tahay waqti aad ku go'aansatid daaweyntaada. Waa in aad hubiso in aad fahanto waxa aad galeyso. Weydiina dhaqtarkaaga inta aad waqti u baahan tahay si aad go'aan ku gaarto. Dadka qaar ayaa go'aansada in aysan daawo rabin. Dadkuna xaq ayey u leeyihiin in ay diidaan in daawo lagu daaweeyo. Waxa ay u baahin yihiin in go'aankan si taxadara kala hadlaan dhaqtarkooda ayna hubiyaan in ay fahmaan sida kansarka u kori karo hadii aanan la daaweyn.

Su'aalaha daaweynta ku saabsan oo aad weydiineyso dhaqtarkaaga

- Maxaad iigula talisay daaweyntaan?
- Maxay keeni kartaa?
- Daaweynta ka dib, imisa ayey iigu qaadaneysaa in aan sugo intaan shaqada ku noqon? Imisa ayey igu qaadaneysaa ka hor intaanan sii wadan karo xarakaadyadeydii caadiga?
- Goorma ayaan ogaan donaa in daawadu shaqeysay
- Ma waxaa jira waxaan u baahanahay in aan sameeyo ka hor, markaas ama ka dib daaweynta?
- Ma waxaan u baahanahay wax ka badan hal nooc oo daaweyn ah?
- Xaggee la igu daaweyn doonaa?
- Qarash imisa ayey iigu kaceysaa? Ma waxaa dhamaan iga kabi kaarka caafimaadka/ caymiskeyga qaaska ah?
- Hadii aan go'aansado in aan rabo aragti labaad, ma ii diri kartaa qof kale?

Qalitaanka

Qalitaanku wuxuu qaadi qaar ama dhamaan kansarka. Qalitaanka qaar waa mid yar, sida jarida. Kansarka maqaarka oo yar ama sameynta biopsy. Qalitaanada kale waa ay waaweyn yihiin sida marka kansar laga saarayo xubin jirka ah. Qalitaanka waxaa xitaa loo sameeyaa in lagu dhiso qeyb jirka ka mid ah ama lagu dedelo qeyb jirka ka mida (tusaale, dib u dhisida naasaha ka dib marka la qalo naaska).

Qofka caadiyan waa la suuxiyaa guud ahaan inta aan la qalin.

Suuxintan guud qofka waa ay seexisaa mana dareemayo xanuun ilaa ay ka baxdo suuxinta. Marmarka qaar dadku waxa ay dareemaan xanuun marka ay ka soo kacaan suuxinta. Dhaqtarka iyo kalkaaliyaasha ayaa daawa siin kara si qofku u dareemo xanuun yar.

Qaliinka qofkasta wuxuu u saameeyaa si kala duwan. Dadka qaar maalmo ayey ku bogsoodaan dadka lagu sameeyay qalitaanka weyn, waxay ay ku qaadan kartaa setimaano ama bilo intay caadi dareemi lahaayeen..

Hadii lagu qalay kalkaaliyahaaga ama dhaqtarkaaga ayaa kuu sharaxi sidii aad u xanaaneyn lahayd jirkaaga intaad bogsooneyso. Dib u kabashada ayaa saameyn ku yeelan karta waxaaad cuni karto ama intaad jimicsi sameyn karto. Hadii aadan hubin waxaad sameyn karto weydii dhaqtarkaaga ama kalkaaliyahaaga.

Waa iska caadi in aad xanuunsato qalida ka dib. Iska hubi in aad daawo weydiisato kaa yareysa xanuunka markasta oo aad u baahato.

Qalitaanka waxaa laga yaabaa in uu noqdo daawada ugu horeysa ee kansarka. Gadaal waa laga yaabaa in uu qofku qaato kiimiko ku daaweyn iyo/ama shucaac ku daaweyn.

Su'aalaha ku saabsan qaliinka oo aad weydiineyso dhaqtarkaaga

- Ma lahaan doonaa xanuun markaan ka soo kaco suuxinta?
- Markaan ka kaco qalitaanka wax ma cuni karaa oo sariirta ma ka kici karaa?
- Jirkayga tubooyin ma ku jiri doonaan? Xaggee, maxayse yihiin?
- Maxaan sameyn karaa oo aan isku cawimi karaa nafsadeyda si aan u caafimaado qalida ka dib?
- Maxaan daaweyn kale u baahanahay?

▶ *Somali*

Treating cancer

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali (03) 9209 0169**
- **English 131120**

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004

Daawaynta kansarka

Kiimiko ku daaweynta

Kiimiko ku daaweynta kansarka waa daawo dili karta unugyada kansarka iyadoo qasaara aad u yar gaarsiineysa unugyada caadiga ah. Kiimiko ku daaweynta waxay ka joojin unugyada kansarka in ay tarmaan. Kiimiko ku daaweynta marmarka qaar waa daawada ugu horeysa ee kansarka. Hase ahaatee caadiyan qofku kiimiko ku daaweyn wuu qaadan ka dib daaweynaha kale. kiimiko ku daaweyntu waxa ay cawini dilida unugyada kansarka ee ka baxsaday qalitaanka iyo ku daaweynta raajada.

Dadka qaar ayaa u baahan in ay qaataan kiimiko ku daaweynta intay joogaan isbitaalka dadka qaarna waxa ay soo booqan karaan saacado yar si ay u qaataan kiimiko ku daaweyn tooda. Marmarka qaar guriga ayaa laguugu siin karaa kiimiko ku daaweynta. Caadiyan qofku wuxuu qaadan kiimiko ku daaweyn dhowr saacadood maalmo yar, oo ay ku xigto nasasho labo ilaa sedex setimaan. Qofku wuxuu caadiyan qaadan dhowr maado oo daaweyn ah ilaa iyo mudo dhowr bilood ah. Caadiyan kiimiko ku daaweynta waxaa la iska siiyaa xididka iyadoo cirbad la isku durayo. Dadka qaar tubo ayaa loo geliyaa maqaarkooda dhexdiida si ay uga cawinto ka qaadashada kiimiko ku daaweynta si joogta ah xididka.

Tani waxay yareyneysaa dhibaato badan oo gaarta xididka.

Tubada waxa ku jiri xididka inta ay ka dhamaaneyso qaadashada kiimiko ku daaweynta. Kiimiko ku daaweynta waxaa kaloo loo qaadan karaa kaniini ahaan, cirbad muruqyada la iskaga duro ama maqaarka kareem ahaan.

Kiimiko ku daaweyntu waxa ay keeni kartaa waxyeelo aan raagin. Waxay keeni kartaa matag, lalabo iyo timaha oo madaxa iyo jirka ka go'a. daawo ayaa kaa cawimeysa lalabada iyo mataga. Timaha go'a xilliga daaweynta kiimikada waxa ay bilaabaan in ay soo baxaan markale dhowr bilood ka dib Markey joogsato daaweynta.

Kiimiko ku daaweynta waxay kaloo keeni kartaa waxyeelo daba dheeraata. Taasoo wax yeeli kartaa qofka tarankiisa, tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in caadada kaa joogsato in mudo ah ama waligeedba. Hadii aad qorsheysato in aad ilmo dhasho, aadna u baahan tahay in aad qaadato kiimiko ku daaweynta, weydii dhaqtarkaaga waxaad sameyn karto. Tusaale ahaan nimanka shahwadooda ayaa loogu keydin isbitaalka ama sheybaar.

Su'aalaha ku saabsan kiimiko ku daaweynta oo aad weydiineyso dhaqtarkaaga:

- Imisa ayey daaweyntu qaadan?
- Waxyeeladee ayaan lahaan doonaa?
- Ma jirtaa waxyeelo waarta oo daaweyntan ka iman karta?
- Maxaan sameyn karaa nafteyda sidii aan isku xanaaneyn lahaa markaan qaadanayo kiimiko ku daaweynta?

Shucaaac ku daaweyn

Shucaac ku daaweynta waa daaweyn la isticmaalo shucaac. shucaacu waa nooc ka mida quwada waxay ka joojin kartaa unugyada kansarka tarmida. ku daaweynta shucaaca waxay waxyeeleyn kartaa unugyada caadiga ha laakiin waa ka soo kaban karaan.

Shucaaca labo hab ayaa la isku siiyaa. Korka, oogada mashiin ayaa shucaac ku abaaraya kansarka iyo cadadka ku wareegsan. Gudaha jirka, walax kaahfal ah oo ku jira kabsalka ayaa jirka la gelin korka ama agta kansarka.(hadii ragu ay qaataan daaweynta shucaaca noocaana kansarka prostate yahay waxaa lagula taliyaa in ay isticmaalaan kondom xilliga galmada labada setimaan ee ugu horeysa marka kabsalka lagu rido waa in ay arintaas kala hadlaan dhaqtarkooda). Shucaac ku daaweynta qofka kama dhigo kaahfale daaweynteedana xanuun ma leh. Shucaacu dadka qaar waxa ay u baahan yihiin hal mar daaweyn ah, qaarna dhowr mar ayey u baahan yihiin. Daaweyn kastaa waxaa ay qaadataa dhowr daqiiqooo kaliya laakiin waqti badan sii booqashadooda. Tirada maalmaha uu qofku u baahan yahay in uu ku qaato daawada waa kala duwan tahay. Dhaqtarkaaga ayaa go'aamin tirade daaweynta ee kugu haboon.

Dadka qaar bey waxyeeleysaa ku daaweynta shucaaca waxaa ka mida daal, , maqaarka oo casaada ama dareenta gubasho, lalabo, matag iyo shuban. Dadka qaar baan waxba ku noqon.

Su'aalah ku saabsan shucaac ku daaweynta oo aad weydiineyso dhaqtarkaaga:

- Imisa ayey qaadan daaweynteyda?
- Waxyeeladee ayaan yeelan?
- Sidee baan isku xanaaneyn karaa nafteyda markaan qaadanayo shucaac ku daaweynta.

Somali

Treating cancer

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali (03) 9209 0169**
- **English 131120**

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004

Daawaynta kansarka

Dheecaan ku daaweynta

Habkan dheecaanka waa isku xirka unugyada iyo xubnaha kaasoo ka difaaca jirka jeermiska iyo cudurada, waan uu sheegi karaa farqiga u dhexeeya unugyada caadiga ah iyo unugyada kansarka. Dheecaan ku daaweynta waxaa la isticmaalaa daawooyin kiciya habka dheecaanka si ay uga shaqeyso la dirirka kansarka.

Dadka waxaa dheecaan ku daaweynta laga siiyaa afka ama laga duraa xidid ama maqaarka hoostiisa. Dheecaan ku daaweynta waxay keeni kartaa waxyeelo inta badan ah sida hargabka. Dadku waa ay qarqaryoon, dhidid, daal, madax xanuun, murqo xanuun, lalabo, matag iyo shuban.

Su'aalaha ku saabsan dheecaan ku daaweynta oo aad weydiineyso dhaqtarkaaga:

- Sidee dareemi doonaa markan qaato daawada?
- Ma waxaan u baahanahay in aan qaato wax ka hortaga oo qaasa intaan qaadanayo daawada?

Hormoon ku daaweynta

Kansarada qaar (sida kansarka prostate iyo qaar ka mida kansarka naasaha) waxay ku xiran yihiin hormounous jirka soo saaro si ay ku koraan. Daawadu waxay ka hor istaagi jirka in ay soo saaraan hormoondan. Dadka waxaa lagu daaweyn daawo, ama waxa laga yaabaa in la qalo si looga saaro xubin soo saara hormoonkas. Daaweyntu waxa ay ku xiran tahay nooca kansarka qofku qabo.

Waxyeelada ka iman kara ku daaweynta hormoonka waxa ka mida cuntada oo kuu furanta dheecaan hay, miisaanka oo kordha, dadka dabeecadooda iyo rabida galmadooda marmar saameyn ayey ku yeealan kartaa.

Somali

Treating cancer

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali**
  (03) 9209 0169
- **English**
  131120

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004